



Medicare

Miiska ku jira

Medicare	1
Waa maxay barnaamijka Medicare?	1
Yaa heli kara barnaamijka Medicare?	2
Caawimaada lasiiyo dadka danyarta ah qaarkood	5
Iskadiiwaangalinta barnaamijka Medicare	6
Dookhyada helitaanka adeegyada caafimaad	9
Haddii aad leedahay caymis caafimaad oo kale	9
La Xiriirka Lambarka Bulshada	10

Medicare

Waraaqdaan waxay sharaxaad kabixinaysaa waxa uu yahay barnaamijka Medicare, cida lagu caawiyo, iyo dookhyada qaar ee aad haysato marka aad dooranayso caawimaada barnaamijka Medicare. Wixii macluumaadka ugu danbeeyay ah oo kusaabsan Medicare, booqo wargeyska ama wac lambarka lacag la'aanta ah ee hoos kuqoran.

Medicare	<p>Webseetka: www.Medicare.gov</p> <p>Lambarka lacag la'aanta ah: 1-800-MEDICARE (1-800-633-4227)</p> <p>Lambarka TTY: 1-877-486-2048</p>
-----------------	---

Waa maxay barnaamijka Medicare?

Medicare waa barnaamijka caymiska caafimaadka ee wadankeena oo loogu talagalay dadka da'doodu tahay 65 sano jir ama kasii wayn. Dadka kayar da'da 65 ee naafada ah, ama kalyahoodo si rasmi ah ushaqo gabeen, ama qaba xanuunka lawlawga (cudurka Lou Gehrig) ayaa sidoo kale xaq uyeelan karaan Medicare. Barnaamijku wuxuu dadkaas kacaawiyaaa qarashaadka caafimaadka, laakiin madaboolo dhammaan qarashaadka caafimaadka ama lacagta kubaxda daryeelka mudada dheer ah. Waxaad ikhtiyaar uleedahay qaabka aad uhelayso caawimaada Medicare. Haddii aad doorato inaad haysato caawimaadii hore ee Medicare, waxaad gadan kartaa heshiiska caawimaada ee Medicare (oo looyaqaano Medigap) aadna kagadan karto

shirkad caymis ah oo gaar looleeyahay si aad iskaga bixiso qaar kamid ah qarashaadka aysan kaabixinayn Medicare.

Qayb kamid ah canshuuraha mushaarka ee ay bixiyaan shaqaalaha iyo shirkadaha ay ushaqeeyaan ayaa lagu daboolaa inta badan qarashaadka Medicare. Lacagaha bilaha ah, ee badanaa lagajaro Social Security ayaa lagu daboolaa sidoo kale qayb kamid ah qarashaadka.

The Centers for Medicare & Medicaid Services waa wakaalada masuulka ka ah barnaamijka Medicare. Laakiin, barnaamijka Medicare waxaad kacodsanaysaa Social Security, anaga ayaana kusiinayna macluumaadka guud ee barnaamijka Medicare.

Medicare waxay leedahay afar qaybood

- Medicare Qaybta A (caymiska isbitaalka) wuxuu gacan kagaystaa dhiibista qarashaadka daryeelka bukaanka j lajiifiyo isbitaalka ama xaruun daryeel (mudada isbitaalka qofku kujiro). Qaybta A waxay sidoo kale bixisaa qaar kamid ah daryeelka caafimaadka ee guriga, iyo daryeelka dadka cudurada la ildaran.
- Medicare Qaybta B (caymiska caafimaadka) wuxuu kagacan kagaystaa bixinta qarashaadka adeegyada ay bixiyaan dhakhaatiirta iyo daryeel bixiyaasha kale, daryeelka bukaan socodka, daryeelka caafimaadka ee guriga, qalabka caymada leh ee caafimaadka, iyo qaar kamid ah adeegyada kahortaga cudurada.
- Medicare Qaybta C (Medicare Advantage) waxaa kujira dhammaan gunooyinka iyo adeegyada lagu daboolo Qaybta A iyo Qaybta B. Qorshayaasha qaarkood waxaa kamid ah caawimaada bixinta qarashka daawada layskuqoro ee Medicare ay bixiso (Medicare Qaybta D) iyo gunooyinka iyo adeegyada kale ee dheeriga ah.

- Medicare Qaybta D (Medicare caawimaadeeda dhanka daawooyinka bukaanka looqoro) waxay gacan kagaysataa bixinta qarashka daawooyinka bukaanka looqoro.

Waxaad kaheli karnaa macluumaad dheeri ah oo kusaabsan waxyaabaha uu barnaamijka Medicare daboolo *Medicare & You* (Daabacaada Lambarkeedu yahay. CMS-10050). Si aad uhesh nuqulka daabacaada, wac lambarka lacag la'aanta ah ama booqo webseetka Medicare oo ah, www.Medicare.gov.

Eray kusaabsan Medicaid

Waxaad umalayn kartaa in Medicaid iyo Medicare ay iskumid yihiin, laakiin waxaa waaye labo barnaamij oo kaladuwan. Medicaid Waa barnaamij uu gobalku maamulo kaasoo caawimaad dhanka qarashaadka isbitaalka iyo caafimaadka ah siiya dadka danyarta ah. Gobal kasta wuxuu leeyahay shuruucdiisa ugaarka ah ee kusaabsan cida xaq uleh, iyo waxyaabaha uu daboolaa barnaamijka Medicaid. Dadka qaar waxay xaq uleeyihiin labada barnaamijba Medicare iyo Medicaid. Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan barnaamijka Medicaid, laxiriir wakaaladaada caawimaada caafimaad ee deegaankaaga ama xafiiska adeegyada bulshada.

Yaa heli kara barnaamijka Medicare?

Medicare Qaybta A (caymiska isbitaalka)

Dadka jira da'da 65 ama kasii wayn, kuwaasoo ah muwaadiniinta ama dad daganaansho rasmi ah kahaysta Maraykanka, ayaa xaq uleh Medicare Qaybta A. Waxaad xaq uleedahay Qaybta A si lacag la'aan ah markaad gaarto da'da 65 haddii:

- Aad hesho ama aad xaq uleedahay inaad hesho gunooyinka Social Security; ama
- Aad hesho ama aad xaq uleedahay inaad hesho gunooyinka Railroad Retirement Benefits; ama

- Xaaskaaga (nool ama dhintay, ayna kujiraan xaasaska aad isfurteen) uu helo ama uu xaq uleeyahay inuu helo Social Security ama Railroad Retirement Benefits; ama
- Adigga ama xaaskaagu aad muddo dheer kashaqaynayseen shaqo dawladeed taasoo aad dhiibi jirteen canshuuraha Medicare; ama
- Aad adiggu tahay waalidka kutiirsanaa ilmo caymis buuxa lahaa oo dhintay.

Haddii aadan buuxin shuruudahaan, waxaad heli kartaa caymiska isbitaalka ee Medicare Qaybta A adoo dhiibaaya lacag go'an bilkasta. Caadiyan, waxaad gadan kartaa caawimaadaan kaliya xiliyada loogu talagalay diiwaangalinta.

FIIRO GAAR AH: *Inkastoo da'da hawlgabka buuxa ee Social Security aysan hada ahayn da'da 65, waa inaad iskaqortaa barnaamijka Medicare saddex bilood kahor maalinta dhalashadaada ee da'da 65 ay kuubuuksamayso. Waxaad kacodsan kartaa webseetkeena oo ah www.socialsecurity.gov.*

Kahor da'da 65, waxaad xaq uleedahay Medicare Qaybta A si bilaash ah haddii:

- Aad qaadnaysay gunooyinka Social Security muddo 24 bilood ah; ama
- Aad qaadato lacag hawlgabka naafada ee uu bixiyo barnaamijka Railroad Retirement Board aadna buuxiso shuruudaha gaarka ah; ama
- Aad qaadato gunooyinka Social Security ee lasiiyo dadka naafada ah sababo laxiriirta inaad qabto cudurka Lou Gehrig (xanuunka lawlawga); ama
- Aad dawlada ushaqaynaysay muddo dheer adoo bixin jiray canshuuraha Medicare, aadna buuxisay shuruudaha barnaamijka Social Security ee dadka naafada ah muddo dhan 24 bilood; ama
- Aad tahay ilmaha ama xaaska laga dhintay oo da'deedu/diisu tahay 50 ama kawayn, ayna kujiraan carmalooyinka laga dhintay, ee shaqaale ushaqaynaayay muddo dheer Social Security ama kashaqaynaayay shaqo

ay daboosho Medicare oo dawladu leedahay, aadna buuxiso shuruudaha barnaamijka Social Security ee dadka naafada ah; ama

- Aad qabto xanuunka shaqo gabka kalyaha ee abidan ah aadna si joogta ah umarto sifaynta kalyaha ama talaalka xubnaha kalyaha iyo
 - Inaad xaq uleedahay ama aadba hesho gunooyinka bilaha ah ee aad kahesho Social Security ama nidaamka caawimaada dadka hawlgabka ah; ama
 - Aad muddo dheer kashaqaynaysay shaqo dawladeed oo leh barnaamijka Medicare; ama
 - Aad tahay cunuga ama xaaska (uuna kujiro xaaska aad isfurteen) shaqaale (nool ama dhintay) kaasoo muddo kashaqaynaayay Social Security ama shaqo dawladeed oo leh barnaamijka Medicare.

Medicare Qaybta B (Caymiska caafimaadka)

Qofkasta oo xaq uleh Medicare Qaybta A ayaa si lacag la'aan ah iskaga qori kara barnaamijka Medicare Qaybta B asagoo dhiibaaya qarashka joogtada ah ee bilkasta ladhiibo. Dadka qaar ee qarashka badan soogalo ayaa dhiibaaya cadad badan oo qarashka joogtada ah oo bilaha ah ee Qaybta B. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka akhriso *Medicare Caymiska: Xeerarka dadka Lacagaha Badan Soogalaan* (Daabacaada Lambarkeedu yahay. 05-10536), ama booqo www.socialsecurity.gov/benefits/medicare/mediinfo.html.

Haddii aadan xaq ulahayn Qaybta A si lacag la'aan ah, waxaad gadan kartaa Qaybta B, adoon gadanin Qaybta A, haddii aad jirto da'da 65 ama aad kasii wayn tahay aadna:

- Tahay muwaadin Maraykan ah; ama
- Qof aan muwaadin ahayn ee wadanka sifo sharci ah kujooga, kaasoo kunoolaa wadanka United States ugu yaraan muddo shan sano ah.

Waxaad kaliya iska qori kartaa Qaybta B inta lagu jiro mudada loogu talagalay isdiiwaangalintu. Haddii aadan isqorin Qaybta B marka koowaad ee xaq uyeelato caawimaada, waxaa lagaa qaadi karaa lacagta ganaaxa dib dhaca intaad helaysid caawimaada Qaybta B. Akhri Sida layskaga qoro barnaamijka Medicare oo aad kahelayso bogga 6.

Medicare Qaybta C (qorsheyaasha Medicare Advantage)

Haddii aad kahesho gunooyinkaaga Qaybta A iyo Qaybta B sitoos ah dawlada, waxaad haysataa barmaajka rasmiga ah ee Medicare. Haddii aad gunooyinkaaga kahesho ururka Medicare Advantage ama shirkad kale oo gaar looleeyahay ayna aqoonsantahay Medicare, waxaad leedahay qorshaha Medicare Advantage. Qaar badan oo kamid ah qorshayaashaan waxay bixiyaan caawimaad dheeraad ah waxayna hoos udhigi karaan qarashaadka kaabaxa.

Haddii aad haysato Medicare Qaybaha A iyo B, waxaad kubiiri kartaa qorshaha Medicare Advantage. Markaad haysato qorshayaashaan, malahaan kartid siyaasada Medigap, waayo qorshayaasha Medicare Advantage ayaa daboolaa qaar badan oo kamid ah isla gunooyinkaas ay siyaasada Medigap daboosho. Kuwaan waxaa kamid ah gunooyinka sida maalmo dheeraad oo qofku isbitaalka jiifo kadib markay kaadhamaadaan maalmihii barnaamijka Medicare uu kaabixinaayay qarashka.

Qorshayaasha Medicare Advantage waxaa kamid ah:

- Qorshayaasha daryeelka iskuxiran ee Medicare;
- Qorshayaasha Medicare ee adeeg bixiyaasha lashaqeeya barnaamijka (PPO);
- Qorshayaasha lacagta ah ee gaarka looleeyahay ee Medicare; iyo
- Qorshayaasha taqasuska ee Medicare.

Haddii aad go'aansato inaad kubiirto qorshaha Medicare Advantage, waxaad isticmaalaysaa kaarkaaga caafimaad ee aad kasoo qaadatay adeeg bixiyaha qorshaha Medicare Advantage markaad daryeel caafimaad raadsanayso. Sidoo kale, waxaa suuragal ah inaad bixiso lacag bilkasta ah oo aad kubixiso qorshahaaga Medicare Advantage sababo laxiriira gunooyinka dheeriga ah ee ay bixiso.

Waxaad iskaqori kartaa qorshaha Medicare Advantage marka koowaad ee aad isdiiwaangalinayso (sida lagu faahfaahiyay Iskadiiwaangalinta barnaamijka Medicare oo kuqoran bogga 6 aad), isla marka koowaad ee aad xaq uyeelato barnaamijka Medicare. Waxaad sidoo kale iskaqori kartaa xiliga isdiiwaangalinta barnaamijka Medicare xiliga ay furuntahay oo laga bilaabo bisha Oktoobar 15 – Diseembar 7 sanad kasta. Xiliga rasmiga ah ee diiwaangalinta lasamaynaayo waa bisha Janaayo 1 sanadka soosocda. Sidoo kale waxaa kira xiliyo gaar ah oo diiwaangalinta lasameeyo sababo jira awgood.

Medicare Qaybta D (caawimaada dhiibista qarashka daawooyinka dhakhtarku qoro ee barnaamijka Medicare)

Qofkasta oo kujira barnaamijka Medicare Qaybta A ama Qaybta B ayaa xaq uleh Qaybta D (caawimaada dhiibista qarashaadka daawada looqoro ee Medicare). Gunoooyinka Qaybta B waxaa lagu heli karaa ayagoo iskood utagaan ama lasocoda qorshaha Medicare Advantage. Gunoooyinka looqondeeyay daawada iskusi ayay uga shaqeeyaan labada qorshaha. Kubiirista qorshaha Medicare ee daawooyinka dhakhtarku kuuqoro waa mid iskaa ah, waxaadna dhiibaysaa lacag dheeri ah oo bilkasta ladhiibaayo si caawimaada lagu siiyo. Dadka gunooyinka qaata qaar ee qarashka badan soogalo ayaa dhiibaaya cadad badan oo qarashka joogtada ah oo bilaha ah ee Qaybta B. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka akhriso

Medicare Caymiska: Shuruucda dadka gunooyinka qaata ee haysta qarashka badan (Daabacaada Lambarkeedu yahay. 05-10536), ama booqo www.socialsecurity.gov/benefits/medicare/mediinfo.html.

Haddii aadan iskaqorin qorshaha daawada ee Medicare marka koowaad ee aad xaq uyeelato, waxaa lagaa qaadi karaa ganaax lacageed sababo laxiriirta kasoo daahida isdiiwaangalinta hadaad qorshaha gadaal uga biirto. Waa inaad dhiibtaa ganaaxaan ilaa iyo inta aad haysato caawimaada daawada lagu qoro ee Medicare. Hase yeeshee, madhiibaysay ganaax hadaad leedahay qorshaha *Extra Help* (hoos kafiiri), ama qorshe kale oo la aqoonsanyahay oo lagu daboolo daawada lagu qoro. Si uu mid la aqoonsanyahay unoqdo, caawimaadu waa inay bixisaa, celcelis ahaan, ugu yaraan xadiga caawimaadeed ee daawada lagu qoro uu kubixiyo barnaamijka Medicare.

Waxaad iskaqori kartaa marka koowaad ee aad isdiiwaangalinayso (sida lagu faahfaahiyay Iskadiiwaangalinta barnaamijka Medicare oo kuqoran bogga 6 aad), isla marka koowaad ee aad xaq uyeelato barnaamijka Medicare. Waxaad sidoo kale iskaqori kartaa xiliga isdiiwaangalinta barnaamijka Medicare xiliga ay furuntahay oo laga bilaabo bisha Oktoobar 15 – Diseembar 7 sanad kasta. Xiliga rasmiga ah ee diiwaangalinta lasamaynaayo waa bisha Janaayo 1 sanadka soosocda. Sidoo kale waxaa kira xiliyo gaar ah oo diiwaangalinta lasameeyo sababo jira awgood.

Caawimaada lasiiyo dadka danyarta ah qaarkood

Haddii aadan awoodin dhiibista qarashka joogta ah ee barnaamijka Medicare iyo qarashaadka daawooyinka kale, waxaa suuragal ah inaad caawimaad kahesho gobalkaaga. Gobaladu waxay barnaamijyo siiyaan dadka xaqa uleh Medicare kuwaasoo danyar ah. Barnaamijyada qaar ayaa dhiibi kara qarashaadka joogta ah ee Medicare qaarna waxay dhiibaan lacagaha lagaa jarto iyo

caymisyada Medicare. Si aad xaq ugu yeelato, waa inaad leedahay barnaamijka Medicare Qaybta A aadna tahay qof danyar ah oon dhaqaalo badan haysan.

Waxaad gali kartaa oonleenka si aad uhesho macluumaad dheeri ah oo kusaabsan barnaamijyadaan adoo galaaya webseetka Centers for Medicare & Medicaid Services. Booqo www.Medicare.gov kadibna raadi barta ciwaankeedu yahay “Your Medicare Costs” (Qarashaadkaaga Medicare) kadibna siigal barta ay kuqorantahay “Get help paying costs.” (Hel caawimaada bixinta qarashka). Waxaad sidoo kale booqan kartaa www.Medicare.gov/publications si aad u akhrido faahfaahinta *Raadso Caawimaad Lagaasiiyo Qarashaadka ay kaaqaado Medicare: Sida loobilaabo* (Daabacaada Lambarkeedu yahay. CMS-10126).

Gobalkaaga kaliya ayaa go’aamin kara inaad xaq uleedahay iyo in kale caawimaada barnaamijyadaan lagaa siinaayo. Si aad u ogaato, laxriir gobalkaaga ama wakaalada deegaankaaga ee caawimaada caafimaadka (Medicaid), adeegyada bulshada, ama xafiiska daryeelka.

Waxaad sidoo kale heli kartaa *Extra Help* si lagaaga dhiibo qarashaadka sanadkii lagaa jaro, qarashaadka bilaha ah, iyo qarashaadka daawooyinka lagu qoro ee laxiriira barnaamijka Medicare ee caawimaada daawooyinka layskuqoro (Qaybta D). Waxaad xaq uyeelan kartaa *Extra Help* haddii aad tahay qof danyar ah (aadna kujirto heerka dawlada federalku udajisay faqriga) aadana haysan ilo dhaqaale. Xadidaadahaan dhanka qarashka iyo ilaha dhaqaale way isbadali karaan sanad kasta, waxaadna nagasoo wici kartaa lambarada aan hada isticmaalno.

Si ootomaatig ah ayaad xaq ugu yeelanaysaa umana baahnid inaad codsato *Extra Help* haddii aad leedahay barnaamijka Medicare aadna buuxiso mid kamid ah shuruudaha soosocda:

- Haddii aad leedahay caawimaada Medicaid oo dhamaystiran;
- Aad hesho Supplemental Security Income (SSI); ama
- Aad kujirto barnaamij gobalku maamulo kaasoo kaadhiiba qarashaadkaaga jooftada ah ee Medicare.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan helitaanka caawimaad laxiriirta dhiibista qarashaadka daaqooyinka lagu qoro, wac lambarka lacag la'aanta ah ee Social Security'ama booqo websetkeena. Sidoo kale waxaad si oonleen ah uga codsankartaa bogga www.socialsecurity.gov/extrahelp.

Iskadiiwaangalinta barnaamijka Medicare

Goorma ayaan codsanayaa?

Haddii aad markii horeba qaadanaysay gunooyinka Social Security, ama caawimaadaha dadka hawlgabka ah, waxaan kusoo diraynaa macluumaadka kahor dhawr bilood intaadan xaq uyeelan barnaamijka Medicare. Haddii aad kunooshahay mid kamid ah 50 gobal, Washington, D.C., the Northern Mariana Islands, Guam, American Samoa, ama U.S. Virgin Islands, si ootomaatig ah ayaan kaaga qoraynaa Medicare Qaybaha A iyo B. Hase yeeshee, maadaama ay qasab tahay inaad dhiibto lacag joofto ah bishiiba si caawimaada B lagu siiyo, waxaad dooran kartaa inaad kabaxdo.

FIIRO GAAR AH: *Dadka dagan Puerto Rico ama wadamada shisheeye maheli doonaan Qaybta B si iskeed ah. Waa inay doortaan gunadaan.*

Haddii aadan horay uhelayn gunooyinka, waa inaad laxiriirto Social Security kudhawaad saddex bilood intaan lagaarin dhalashadaada 65 aad si aad ucodsato Medicare. Waad codsankartaa Medicare xataa haddii aadan doonayn inaad da'da 65 kuhawlgabto.

Kadib markaad iskaqorto Medicare, waxaa lagusoo dirayaa kaar gaduud, caddaan, iyo buluug ah oo ay leedahay Medicare kaasoo muujinayaa inaad heshay Qaybta A, Qaybta B ama labadaba. Dhigo kaarkaaga meel amaan ah si aad uqaadato markaad ubaahato. Haddii kaarkaagu dhumo ama lagaa xado, waxaad codsankartaa in kaarka lagu cusboonaysiiyo si oonleen ah adoo samaysanaaya ciwaanka *my* Social Security adoo galaaya bogga www.socialsecurity.gov/myaccount, ama wac lambarka lacag la'aanta ah ee Social Security. Waxaad sidoo kale helaysaa buuga gacmeedka *Medicare & You* handbook (Daabacaada Lambarkeedu yahay. CMS-10050) taasoo sharaxaysa gunooyinkaaga Medicare dookhyada qorshayaasha.

Xaaladaha kale ee diiwaangalinta

Waa inaad sidoo kale laxiriirtaa Social Security si aad ugala hadasho codsiga barnaamijka Medicare Haddii:

- Aad tahay nin ama naag garoob ah oo naafo ah da'daaduna udhaxayso 50 iyo 65, laakiin aadan codsan gunooyinka dadka naafada ah sabab laxiriirta inaad horay uqaadanaysay guno kale oo uu bixiyo barnaamijka Social Security;
- Aad tahay shaqaale dawladeed aadna naafoowday kahor da'da 65;
- Adigga, xaaskaaga, ama ilmo kugutiirsan uu qabo xanuunka shaqo gabka kalyaha;
- Aad horay uqaadanaysay gununada Medicare Qaybta B, laakiin aad iskaga baxday cawimaada;
- Aad iskaga baxday barnaamijka Medicare Qaybta B markii koowaad ee aad heshay Qaybta A; ama
- Adigga ama xaaskaaga midkiin ushaqeeyay xarumaha tareenada.

Mudada isdiiwaangalinta kowaad ee Qaybta B

Marka koowaad ee aad xaq uyeelato barnaamijka Medicare Qaybta A, waxaad haysataa mudo todobo maalmood ah (mudadaada diiwaangalinta koowaad) taasoo aad iskaga qorayso Qaybta B. haddii aad xaq uyeelato markaad gaarto da'da 65 sano, mudada isdiiwaangalintaada koowaad waxay bilaabmaysaa saddex bilood kahor maalinta dhalashadaada ee da'da 65 sano ay kuubuuxsanto, ayna kujirto bisha aad jirsato 65, iyo saddex bilood kadib markaad da'daas kuubuuxsanto. Haddii aad xaq uleedahay barnaamijka Medicare sababo laxiriirta naafonimo ama shaqo gabka rasmiga ah ee kalyaha, mudada isdiiwaangalintaada koowaad waxay kuxirantahay maalinta naafonimadaada ama daawayntaada ay bilaabato.

FIIRO GAAR AH: Haddii aadan isqorin Qaybta B marka koowaad ee xaqa uyeelato caawimaada, waxaa lagaa qaadi karaa lacagta ganaaxa dib dhaca intaad helaysid caawimaada Qaybta B. Sidoo kale, waxaa laga yaabaa inaad sugto isqorista danbe, taasoo dib udhac kuridaysa caawimaadaan.

Goorma ayay diiwaangalintayda Qaybta B ay dhaqangalaysaa?

Haddii aad aqbasho isdiiwaangalinta ootomaatiga ah ee barnaamijka Medicare Qaybta B, ama hadaad isdiiwaangaliso saddexda bilood ee ugu horaysa ee mudada isdiiwaangalintaada koowaad, caawimadaada waxay bilaabanaysaa bisha koowaad ee aad xaqa uyeelatay caawimaada. Haddii aad isdiiwaangalisay inta lagu jiro afarta bilood ee ugu danbaysa, caawimaadaada waxay bilaabanaysaa hal ilaa saddex bilood kadib markaad isdiiwaangaliso.

Shaxda soosocota waxay muujinaysaa xiliga barnaamijkaaga Medicare Qaybta B ay dhaqangalaysa:

Haddii aad bishaan iskudiiwaangaliso mudada isdiiwaangalintaada koowaad	Markaas caawimaadaada qaybta B ee Medicare waxay bilaabmaysaa
Hal ilaa saddex bilood kahor intaad gaarin da'da 65	Bisha aad gaarto da'da 65
Bisha aad gaarto da'da 65	Hal ilaa saddex bilood kadib bisha aad gaarto da'da 65
Hal bil kadib markaad gaarto da'da 65	Labo bil kadib bisha aad isdiiwaangalisay
Labo ilaa saddex bilood kahor intaad gaarin da'da 65	Saddex bil kadib bisha aad isdiiwaangalisay

Mudada isdiiwaangalinta guud ee Qaybta B

Haddii aadan iskadiiwaangalin barnaamijka Medicare Qaybta B inta lagu jiro mudada isdiiwaangalintaada koowaad, waxaad haysataa fursad taas lamid ah sanad kasta si aad iskudiiwaangaliso “general enrollment period” (mudada isdiiwaangalinta guud) laga bilaabo bisha Janaayo 1 ilaa bisha Maarso 31. Caawimaadaada waxay bilabmaysaa bisha Luuliyo 1 ee sanadka aad isdiiwaangalisay.

Hase yeshee, waxaa lagaa qaadi karaa ganaax lacageed oo laxiriirta kasoo daahida isdiiwaangalinta ilaa iyo inta aad haysato caawimaada Qaybta B. Lacagta bishii lagaa qaado waxay kor ukacaysaa 10 boqolkiiba 12-kii biloodba oo aad xaq ulahayd Qaybta B, laakiin aadan iskadiiwaangalin.

Mudada isdiiwaangalinta gaarka ah ee loogu talagalay dadka kabaxaaya Qaybta C

Haddii aad kujirto barnaamijka Medicare Qaybta C (qorshaha Medicare Advantage), waxaad iskaga bixi kartaa qorshaha waxaadna uwareegi kartaa Medicare si rasmiga ah laga bilaabo Janaayo 1 ilaa Febraayo 14. Haddii aad isticmaasho dookhaan, waxaad haysataa

ilaa iyo 14 Febraayo inaad kubiirto Medicare Qaybta D (qorshaha daawada dhakhtarku kuuqoro Medicare). Caawimaadaadu waxay bilaabanaysaa maalinta koowaad kadib marka qorshahaaga uu soogaaro foomka codsigaaga.

Mudada isdiiwaangalinta ee dadka caawimaadooda lagu bixiyo qorshaha caafimaad ee kooxda shirkadaha ay ushaqeeyaan

Haddii aad jirto da'da 65 ama aad kasii wayntahay aadna kujirto qorshaha caawimaada caafimaad ee koox, kana timaada **shaqadaada ama tan xaaskaagu hada kashaqayso**, waxaad heli kartaa “special enrollment period” (mudada isdiiwaangalinta gaarka ah) taasoo aad iskudiiwaangalinayso barnaamijka Medicare Qaybta B. Tani waxay kadhigantahay inaad dib dhigan karto iskadiiwaangalinta barnaamijka Medicare Qaybta B adoon sugin mudada isdiiwaangalinta guud aana dhiibayn wax ganaax ah oo laxiriir kasoo daahida isdiiwaangalinta. Waxaa jira xadidaadyo, waxaan si wayn kuugula talinaynaa inaad laxiriirto Centers for Medicare & Medicaid Services (CMS) si aad uhesho macluumaad dheeraad ah. Macluumaadka aad kala xiriirayso CMS waxaad kahelaysaa bogga 1 aad ee bugaan. Shuruucda waxay kuufasaxayaan:

- Inaad iskadiiwaangaliso Medicare Qaybta B xili kasta intaad haysato qorshaha caafimaad ee kooxda shirkada aad hada ushaqayso; ama
- Iskaqor barnaamijka Medicare Qaybta B inta lagu jiro mudada sideed bilood ah oo kabilaabanaysa bisha shaqadu kaadhamaato ama caawimaada caafimaadka ee kooxda aad ushaqayso ay dhamaato, kii hadba soohormara.

Isma qori kartid adoo isticmaalaaya mudada isdiiwaangalinta gaarka ah haddii shaqadaada ama qorshaha caawimaada caafimaad ee shirkada aad ushaqayso dhamaado intii lagu jiray mudada isdiiwaangalinta koobaad.

Markaad iskadiiwaangaliso barnaamijka Medicare Qaybta B inta aad wali kujirto qorshaha caawimaada caafimaad ee kooxda, ama bisha koowaad oo dhamaystiran marka qorshuhu kaadhamaado, caawimaadaada barnaamijku waxay bilaabanaysaa midkood:

- Maalinta koowaad ee bisha aad isdiiwaangalisay; ama
- Haddii aad doorato, maalinta koowaad ee mid kamid ah saddexda bilood ee soosocda.

Haddii aad isdiiwaangaliso mid kamid ah todobada bilood ee soohartay “special enrollment period,” (mudada isdiiwaangalinta gaarka ah,) caawimaadaada Medicare Qaybta B waxay bilaabanaysaa maalinta koowaad ee bisha soosocda.

Haddii aadan isdiiwaangalin dhamaadka mudada sideeda bilood ah, waa inaad sugtaa mudada isdiiwaangalinta guud ee soosocota, taasoo bilaabanaysa bisha Janaayo 1 ee sanadka soosocda. Waxaa sidoo kale suurogal ah inaad dhiibto lacagta ganaaxa kasoo daahida diiwaangalinta ilaa iyo inta aad kujirto Qaybta B, sidii aan horayba usheegnay.

Haddii aad hesho gunooyinka Naafada ee barnaamijka Social Security aadna caawimaad kahesho qorshaha caafimaad ee koox balaaran oo ka imaanaysa shaqadaada hada ama shaqada qof qoyskaaga kamid ah, waxaad sidoo kale heli kartaa isdiiwaangalinta mudada gaarka ah. Haday sidaas tahay, waxaad yeelanaysaa xaq aad kubixinayso lacagta joogtada ah oo lamid ah tan ay dhiibaan hada shaqaalaha da'doodu tahay 65 ama kasiwayn. Wixii macluumaad dheeri ah, laxiriir Centers for Medicare & Medicaid Services.

FIIRO GAAR AH: *COBRA iyo caawimaada dhanka caafimaad ee dadka hawlgabka ah laguma xisaabinaayo caawimaada aad kahesho shirkada aad hada ushaqayso.*

Dookhyada helitaanka adeegyada caafimaad

Dadka qaata gunooyinka Medicare waxay heli karaan dookhyo a kuhelayaan adeegyada daryeelka caafimaadka.

Waxaad kaheli kartaa macluumaad dheeri ah oo kusaabsan dookhyada daryeelka caafimaadka daabacaadaha soosocda:

- *Medicare & You* (Daabacaada Lambarkeedu yahay. CMS-10050) — CMS ayaa buugaan tilmaamaha boostada ugu diraysa dadka markay iskaqoraan barnaamijka Medicare waxayna daabacaad lacusboonaysiiyay udirayaan sanad kasta markaas kadib.
- *Doorashada Siyaasada Medigap: Tasmada Caymiska Caafimaadka ee Dadka qaata Medicare* (Daabacaada Lambarkeedu yahay. CMS-02110) — Tasmadaan waxay qeexaysaa sida qorshayaasha kale ee daryeelka caafimaadka ay utaageeraan Medicare waxayna tilmaamo kabixinaysaa qaababka dukaamaysiga dadka qorshayaashaan raadinaaya.

Si aad uhesho nuqul kamid ah daabacaadahaan, booqo www.Medicare.gov/publications, ama wac lambarka lacag la'aanta ah, **1-800-MEDICARE (1-800-633-4227)**. Haddii aad tahay qof dhago la' ama dhago culus, wac TTY **1-877-486-2048**.

Haddii aad leedahay caymis caafimaad oo kale

Medicare Qaybta A (caymiska isbitaalka) waa mid si bilaasha uu kuhelayaao kudhawaad qofkasta. Waa inaad dhiibtaa lacagaha bilkasta labixiyo ee barnaamijka Medicare Qaybta B (Caymiska caafimaadka). Haddii aad horay uhaysatay caymis kale oo caafimaad markaad xaq uyeelato barnaamijka Medicare, lacagta bilkasta lagaa qaado madhantahay heer aad ubaahato inaad iskadiiwaangaliso Qaybta B?

Jawaabtu way kaladuwantahay qofkasta iyo nooca caymiska caafimaad ee aad hesho. Inkastoo aanaan kusiin karin jawaabaha “yes” (haa) ama “no” (maya), waxaan kusiin karnaa macluumaad kaacaawinaaya inaad go'aan gaarto. Sidoo kale waxaan talo kaasiin karnaa haddii lagu xukumo ganaaxa lacageed ee kasoo daaha isdiiwaagalinta.

Haddii aad haysato qorsho caymis caafimaad oo gaar looleeyahay

Lahadal wakaaladaada caymiska si aad u uragto qaabka qorshahaaga gaarka ah uu uwaafaqsanyahay Medicare Qaybta B. Arintaani sigaar ah ayay muhiim utahay hadaad leedahay xubno qoyskaaga kamid ah kuwaasoo caawimaad kahela isla heshiiskaas. Xasuunoow, sida aan barnaamijka Medicare udaboolin dhammaan adeegyada caafimaad si lamid ah, inta badan qorshayaasha gaarka looleeyahayna badaloobaan wax kasta. Markaad qorshaynayso caawimaada caafimaadka, maskaxda kuhay inta badan daryeelka kalkaalinta guriga ma uubixiyo barnaamijka Medicare ama heshiisyada caymisyada caafimaadka toona. Hal eray oo muhiim ah oo ay tahay inaad kafeejignaato: Si aad naftaada udifaacato, **ha iskajoojin wax caymis caafimaad ah ood haysato ilaa caawimaad barnaamijka Medicare ay kuubilaabato.**

Haddii aad caymis uga jirto koox qorshe caafimaad oo shirkada aad ushaqayso bixiso

Sida sharcigu qabo, qorshayaasha caafimaadka ee shirkadaha wax shaqaalaysiiya oo leh shaqaale dhan 20 ama kasii badan waa inay shaqaalaha hada ushaqeeya iyo xaasaskoodaba oo da'doodu tahay 65 (ama kawayn) ay siiyaan gunooyinka caafimaad ee aysiiyaan shaqaalaha da'da yar.

Haddii adigga ama xaaskaagu aad wali kashaqaysaan aadna kujirtaan qorshe caawimaad oo shirkada aad ushaqayso

ay bixiso, lahadal xafiiska shaqaalaha kahor inta aadan iskaqorin barnaamijka Medicare Qaybta B.

Haddii aad haysato Health Savings Account (HSA)

Haddii aad haysato HSA markaad iskaqoraysid Medicare, masii wadan kartid HSA marka caawimaadaada Medicare ay bilaabato. Haddii aad sii wado adeegaaga HSA kadib marka gunooyinkaaga Medicare bilowdaan, waxaa lagaa qaadi karaa canshuur ganaax ah. Haddii aad rabto inaad siiwadato adeegaaga HSA, waa inaad codsan gunooyinka Medicare, Social Security, ama gunooyinka Railroad Retirement Board (RRB).

FIIRO GAAR AH: *Qaybta A ee lacag la'aanta ah ayaa bilaabata lix bil kahor taariikhda aad codsanayso Medicare (ama Gunooyinka Social Security/RRB benefits), laakiin aan kahorayn bisha koowaad ee aad xaqa uyeelato Medicare. Si aad uga fogaato ganaaxa canshuurta ah, waa inaad joojisaa adeegsiga HSA ugu yaraan lix bilood kahor inta aadan codsan Medicare.*

Haddii aad leedahay difaaca daryeelka caafimaad ee aad kahesho qorshayaal kale

Haddii aad leedahay TRICARE (caymiska ciidanka shaqada kujira, ciidanka militariga ee hawlgabka ah, iyo qoysaskooda), gunooyinkaaga caafimaadka way isbadali karaan ama way dhammaan karaan markaad xaqa uyeelato barnaamijka Medicare. Tani waxay qusaysaa sabab kasta, ayadoon laga fiirinayn da'daada ama goobta aad dagantahay. Haddii aad hawlgab kanoqoto shaqada militariga ama aad tahay qoyska qof ciidan militariga kahawlgabay, waa qasab inaad iskadiiwaangalisaa Qaybta A iyo Qaybta B marka koowaad ee aad xaqa uyeelato si aad usii qaadato caawimaadaada TRICARE. Waxaad halaysaa lataliye dhanka gunooyinka ciidanka militariga ah lasiiyo **www.milconnect.dmdc.osd.mil**, ama wac Xaruunta Macluumaadka Diifaaca ciidanka, lambarkeeda lacag la'aanta ah

1-800-538-9552 (TTY 1-866-363-2883) kahor inta aadan go'aansan inaad iskaqorto caymiska caafimaadka ee Medicare (Qaybta B).

Haddii aad leedahay difaaca daryeelka caafimaadka ee Adeegga Caafimaadka dadka Hindida ah, Waaxda Arimaha Dadka Hawlgabka ee Dawlada ushaqayn jiray, laxiriir xafiisyadaas si ay kaaga caawiyaan go'aaminta inay faa'iido kuugu jirto iskaqorista barnaamijka Medicare Qaybta B.

MUHIIM AH: *Haddii aad haysato caawimaada VA aadana isqorin Qaybta B marka koowaad ee aad xaqa uyeelato, waxaa lagaa qaadi karaa lacagta ganaaxa dib dhaca intaad helaysid caawimaada Qaybta B. Sidoo kale, waxaa laga yaabaa inaad sugto isqorista danbe, taasoo dib udhac kuridaysa caawimaadaan.*

Si aad uhesho macluumaad dheeri ah oo kusaabsan sida qorshayaasha kale ee caymiska caafimaadku ulashaqeyyaan barnaamijka Medicare, Booqo **www.Medicare.gov/publications** si aad u akhrisato buuga *Medicare iyo Gunooyinka Kale ee Caafimaadka: Tasmadaada ku aadan Cida Ugu Horbixisa* (Daabacaada Lambarkeedu yahay. CMS-02179), ama wac Medicare lambarka lacag la'aanta ah, **1-800-MEDICARE (1-800-633-4227)**. Haddii aad tahay qof dhago la' ama dhago culus, wac TTY **1-877-486-2048**.

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan 80, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriir kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda www.socialsecurity.gov. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada lagu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today
and tomorrow

Social Security Administration
Publication No. 05-10043-SO | March 2018
Medicare

Medicare (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha